



Nozibele iyo saddexdii timo

- ✎ Tessa Welch
- 👤 Wiehan de Jager
- 💬 Abdi Muse
- 💬 somali
- 📊 nivå 3



Wakhti dheer ka hor, saddex gabdhood ayaa u baxay inay soo guurtan qoryo.



Waxay ahayd maalin kulul sidaa darteed waxay aaden webiga si ay ugu soo dabaashaan. Way cayaaren waxayna firdhiyeen kuna dabaasheen biyaha.



Si kadis ah, waxay xaqiiqsadeen in ay yihiin kuwa daahay. Waxay dib ugu soo dagdageen tuulada.



Markii ay ku dhawaadeen guriga, Nozibele waxay saartay gaceenteeda qoorta. Waxay soo iloowday silsiladeedii! “Fadlan ila laabta!” ayay kabariday saaxiibaddeeda. Laakiin saaxiibaddeeda waxa ay dhaheen waa xilli aad u dambe.



Sidaas darteed Nozibele ayaa kaligeed dib ku laabatay webiga. Way heshay silsiladeedi waxayna usoo dhaqsatay guriga. Laakiin waxay ku luntay mugdiga.



Meel fog waxay ka aragtay iftiin ka imaanayo aqal. Waxay u dhakhsatay dhinaciisa waxayna garaacday albaabka.



La yaabkeda, ey aya ka furay albaabka oo ku yidhi, “Maxaad doonaysaa?” “Waan lumay waxaana u baahanahay meel aan seexo,” ayay Nozibele tidhi. “Soogal, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu yidhi eygi. Sidaas darteed Nozibele way gashay gudaha.



Kadib eeygii wuxuu ku yidhi, “Cunto ii kari!”
“Laakiin waligay marna wax uma karrinin eey,”
ayay ku jawaabtay. “Kari, ama waan ku qaniini
doonaa!” ayuu egya yidhi. Sidaas darteed
Nozibele waxeey xoogaa cunto ah u karisay
eeygii.



Kadib eeygii wuxuu yidhi, “Sariirta ii hagaaji!” Nozibele ayaa ku jawaabtay, “Waligay marna sariir uma hagaajinin eey.” “Sariirta hagaaji, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu eygi yidhi. Sidaas darteed Nozibele way hagaajisay sariirti.



Maalin kasta waxay ku qasbanayd in ay wax kariso, nadiifiso oo u dhaqdo eeyga. Dabadeedna, maalin aya eeygii yidhi, “Nozibele, maanta waa in aan booqdaa saaxiibo, nadiifi guriga, cuntada kari, oo dhaq alaabta kahor intaan soo laaban.”



Dhakhsaba sidaas tuu eeyga u tagay, Nozibele ayaa madaxa ka soosiibtay saddex timood. Waxay hal tin dhigtay sariirta hoosteeda, mid kalane albaabka gadaashiisa, midna gudaha xerada. Kadibna waxay u carartay guriga sida ugu dhakhsaha badan oo ay awooday.



Markii eygii dib u soo laabtay, wuxuu raadiyay Nozibele. “Nozibele, xagee baad joogtaa?” ayuu ku qayliyey. “Waa ikan, sariirta hoosteeda,” ayay tiri tintii ugu horraysay. “Waa ikan, albaabka ka gadaashiisa,” ayay tiri tintii labaad. “Waa ikan, gudaha xerada,” ayay tiri tintii saddexaad.



Dabadeed eeygii waxuu ogaaday in Nozibele ay sirtay. Sidaas darteed eeygii wuu orday oo ku orday wadadi illaa iyo tuulada. Laakiin walaalaha Nozibele ayaa halkaas ku sugayay iyagoo ulo waaweyn. Eeygii wuu jeestay oo wuu cararay, waligiisna dib looma arag.



Barnebøker for Norge

barneboker.no

Nozibele iyo saddexdii timo

Skrevet av: Tessa Welch

Illustret av: Wiehan de Jager

Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons
[Navngivelse 3.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).